

U qalmida Katanaasulida

Qofka waa in uu kasoo baxo dhammaan shuruudaha soo socda:

- In uu noqdo macmiil u qalma Maamulka Naafonimada Koriinka (DDA) sida ku cad xeerka RCW 71A.10.020(5).
- In uu leeyahay naafonimo sida waafaqsan shuruuda lagu qoray Xeerka Dammaanada Bulshada.
- In uu codsado daryeelka adeegyada muddada-dheer ah/ Medicaid oo uuna xaqiijiyay dakhli aan dhaafin 300% ee ah heerka dheefta federaalka ee caadiga ah ee SSI.
 - Loogu talagalay carruurta hessa adeegyada ka-tanaasulidda, dakhliga iyo kheyraadyada waalidka lama tixgeliyo.
- In uu haysto kheyraad dhaqaale oo ka yar \$2,000 ama in uu haysto kheyraad dheeraad ah oo ka badan \$2,000 oo ku jira amaanaada baahiyada gaarka ah sida Sanduuqa Amaanada Awqaafta ama koontada ABLE.
- In uu ka soo baxo heerka daryeelka lagu bixiyay gudaha Xarunta Daryeelka Dhexe ee loogu talagalay dadka qaba Naafonimada Caqliga sida lagu xaddidey dhinaca Qiimeynta Maamulka Naafonimada Koriinka (DDA).
- Qorshaha adeegga qofka-xuddunta u yahay ayaa wuxuu muujinayaa sida baahiyada caafimaadka qofka, bedqabka, iyo baxnaaninta loogu buuxin karo gudaha bulshada ee ah adeegga ka-tanaasulidda bilaha ah iyo/ama korjoogteynta bilaha ah.
- In uu oggolaado aqbalidda adeegyada ku salaysan-bulshada iyo guriga bedelkii uu oggolaan lahaa ICF/IID.
- Ka-qaybgalayaasha CIIBS waa in sidoo kale:
 - Ay jiraan da'da 8 ilaa 17 ee loogu talagalay isqoridda hore.
 - Lagu go'aamiyo qiimeyntooda CARE in ay halis daran ama sare ugu jiraan meelaynta guriga ka baxsan ee sababta u ah hab-dhaqannada adag.
 - Ay la nool yihiin qoys oggolaanaya in uu ka qaybgalo barnaamijka CIIBS.
 - Ay la nool yihiin qoys oggolaanaya in uu ka qaybgalo barnaamijka CIIBS.

Helidda Ka-tanaasulidda


Codsi isqorid ah ama loogu bedelanayo ka-tanaasulid bedel ah ayaa la samayn karaa wakhti kasta. Weydii maamulaha xogta kiiska. Haddii aan joogin maamulaha xogta kiiska, ku dhaaf fariin khadka Adeega Lacag-La'aanta ah ee lagu qoray hoosta Xafiisyada Gobolka ama ugu soo dir codsiga si toos-ah internetka cinwaankan www.dshs.wa.gov/dda/service-and-information-request. Ka-tanaasulid kasta waa mid ku xadidan tirada dadka loo adeegi karo. Maamulka Naafuoyinka Koriinka wuxuu haystaa awood uu ku xadido isqoridda la isku qoro katanaasulida kusalaysan helida maal-gelin loogu talagalay kaqayb galayaasha katanaasulida cusub.

Kasoo bixida shuruuda adeega ee loogu talagalay katanaasulida madamaana qaadayso helida adeegaha katanaasulida.

Xuquuqaha Maamulka Dhagaysiga

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu helo dhageysiga maamul la xiriira oo leh go'aamadan soo socda iyada oo aan la eegayn barnaamijka ama adeegga:

- U qalmida Maamulka Naafonimada Koriinka (DDA) la diiday, la joojiyey ama Maamulka Naafonimada Koriinka (DDA) uu sameeyo ficil diib u dhigid aan macquul ahayn oo kusaabsan codsigaaga; ama
- Nooca ama tirada adeega lagu oggolaaday in aad heshid; ama
- Diidis, dib u dhimis, ama joojinta adeegaha; ama
- Diidis doorashada adeega ah ee uu diido bixiyaha adeega; ama
- Haddii loo guuriyo deegaan kale, midkaas oo aan ahayn mid uu qofku doortay; ama
- Diidista Maamulka Naafonimada Koriinka (DDA) uu diido in uu u hoggaansamo codsiga ah in aanan oggaysiiso loo dirin qof kale; ama
- Ka saarid lagaa saaro barnaamijka ka-tanaasulidda; ama
- Diidista codsiga lagu helayo adeegyada ICF/IID bedelkii adeegyada ka-tanaasulidda; ama
- Maamulka Naafonimada Koriinka (DDA) in uu go'aansado in adeegaha lagu helo ka-tanaasulidda hadda ahi ay kasoo baxayso baahoyinka caafimaadka iyo daryeelka oona qofku diidan yahay; ama
- Qof qiimeyn loogu sameeyay in uusan u baahnayn heerka daryeelka ICF/IID; ama
- Qof qiimeyn loogu sameeyay in uusan kasoo bixin u qalmida CIIBS.



Internet-ka nagu soo booqo halkan:

dshs.wa.gov/dda/service-and-information-request

Ka raadi xafiska halkan:

dshs.wa.gov/DDA/dda/find-an-office

Nasoo wac:

Degmooyinka	Telefoonka iyo limaylka
Chelan, Douglas, Ferry, Grant, Lincoln, Okanogan, Pend Oreille, Spokane, Stevens	(800) 319-7116 R1ServiceRequestA@dshs.wa.gov
Adams, Asotin, Benton, Columbia, Franklin, Garfield, Kittitas, Klickitat, Walla Walla, Whitman, Yakima	(866) 715-3646 R1ServiceRequestB@dshs.wa.gov
Island, San Juan, Skagit, Snohomish, Whatcom	(800) 567-5582 R2ServiceRequestA@dshs.wa.gov
King	(800) 974-4428 R2ServiceRequestB@dshs.wa.gov
Kitsap, Pierce	(800) 735-6740 R3ServiceRequestA@dshs.wa.gov
Clallam, Clark, Cowlitz, Grays Harbor, Jefferson, Lewis, Mason, Pacific, Skamania, Thurston, Wahkiakum	(888) 707-1202 R3ServiceRequestB@dshs.wa.gov

Dadka u baahan taageero lagu taageero maqalka ama xiriirka waxay wici karaan Adeega Xoojinta Xiriirka Telefoonka Washington ayaga oo garaaca 7-1-1 ama 1-800-833-6388 (TTY).



Transforming lives

DSHS 22-1755 SM (Rev. 11/20) Somali

Ka-tanaasulidda Taageerada Dhaqanka Gudaha-guriga ah ee Xoojinta Carruurta

Ka ahaada dhinaca Maamulka Naafuoyinka Koriinka



Dulmarka Katanaasulida

Maamulka Naafonimada Koriinka ee Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ayaa wuxuu leeyahay shan barnaamijyo Ka-tanaasulid Medicaid oo ah Adeeg Ku salaysan-Guriga iyo Bulshada. Katanaasul kasta wuxuu bixiyaa adeego gaar ah si looga soo baxo baahoyinka ammaanka iyo caafimaadka gudaha bulshada ah. Ka-tanaasulidda Taageerada Dhaqanka Gudaha-guriga ah ee Xoojinta Carruurta waxay bixinaysaa adeegyo kala-duwan marka aan lagu helin tooska illooyin dhaqaale oo kale (ceymiska khaaska ah, Medicaid, iskuul, iwm.)

Ka-tanaasulidda Taageerada Dhaqanka Gudaha-guriga ah ee Xoojinta Carruurta waxay taageeraysaa dhalinyarada halista ugu jira meelaynta guriga ka baxsan ee sababta u ah hab-dhaqannada adag. Habka CIIBS wuxuu kulug leeyahay gunaanadka qorsheynta iyo taageerada dhaqanka wanaagsan ee qoyska-kusaabsan. Ka-tanaasulidda CIIBS waxay u adeegaysaa shakhsiyaadka ay da'adoodu u dhaxeeyo 8 iyo 20.

Haddii baahida qiimeynta lagu sameeyay adeegaha ay dhaafto baaxada adeega lagu bixiyay hoosta ka-tanaasulidda CIIBS, Maamulka Naafonimada Koriinka (DDA) wuxuu samayn doonaa hal ama wax ka baddan oo dadaalada soo socda ah si aad uga soo baxdid baahoyinka caafimaadka iyo daryeelka:

- In uu ku caawiyo ka-qaybgalayaasha aqoonsashada taakulooyinka dabiiciga dheeraadka ah ee la heli karo;
- In uu bilaabo ka reebid xeerka lagu helo adeegyada aan-ka-tanaasulidda ahayn ee la heli karo kuwaas oo aan ku jirin ka-tanaasulidda CIIBS ee aan ahayn taakulooyinka dabiiciga ah;
- In uu bixiyo codsiga ka-tanaasulid bedel ah oo leh adeegyada loo baahan yahay;

Haddii midna doorashooyinka kor ku qoran kasoo bixin baahoyinka caafimaadka iyo daryeelka, Maamulka Naafonimada Koriinka waxaa dhici karta in ay joojiso u qalmiinta katanaasulida. Haddii laga joojiyo ka-tanaasulidda, shakhsiyaad waxaa dhici karta in ay weli u qalmaan adeegyada Maamulka Naafonimada Koriinka ah (DDA) ama meelaynta xarunta daryeelka ee ICF/IID.

Adeegyada Ka-tanaasulidda

Isticmaal buug-yarahan si aad u qorshaysatid qiimeynta sannadlaha ah. Maareeyaha kheyraadka kiiska ayaa wuxuu sharxi doonaa adeegyada iyo shuruudaha, iyo adeegyada dokumentiga ee lagu doortay gudaha qorshaha adeegga uu qofka-xuddunta u yahay. Adeegyada qaarkood waxay u baahan yihiin oggolaansho iyo dib-u-eegis hore. Weydii Maamulaha Kheyraadka Kiiska (CRM) macluumaadka loogu baahan yahay oggolaanshaha hore. Adeegyada ku jira afarta qaybood waxaa ka mid ah:

- **Adeegaha bulshada** – waxay kor u qaadaan kaqayb galka macamiilka iyo dhexgalka bulshada
- **Adeegaha xirfadeed** – adeegaha taakulada laga bixiyo dhinaca xirfadlayaal qandaraas lala galo
- **Adeegaha daryeel bixinta** – taakulooyin la siiyo kaqayb galayaasha iyo daryeel bixiyayaashooda
- **Alaab iyo adeegyo** – qalab, alaab iyo adeegyo khaas ah oo la siiyo ka qayb-galayaasha



Isticmaal khaanadaha la doorto si aad u tustid maamulaha xogta kiiska (CRM) adeegaha aad danaysid:

Adeegyada Bulshada

- **Gaadiid** – Magdhow lasiiyo bixiyaha gaadiidka aan ahayn-mid caafimaad ee loogu baahanyahay in lagu helo adeegaha katanaasulka lagu xadiday gudaha qorshaha adeega PCSP.

Adeegyo Xirfadeed

- **Adeegaha xasilinta** – adeego lagu caawinayo laguna taageerayo inta lagu guda jiro dhibaatooyinka caafimaadka hab-dhaqanka. Waxaa ka mid ah baxnaanin gaar ah, wada-tashiga qoyska/shaqaalaha iyo sariirta leexinta dhibaatada.
- **Baxnaanin gaar ah** – taageerada shakhsiyeed ee lagu baranayo ama lagu joogteynayo xirfado nololeed kala duwan.
- **Taakulada hab dhaqanka wanaagsan iyo latalinta*** – taakulooyin lagu qiimeeyo laguna sheego baahoyinka caafimaadka hab dhaqanka. Kuwan waxaa ka mid ah waxqabadyada kor loogu qaado hab-dhaqannada lagu sii wanaajinayo tayada nolosha iyo u-dhammaanshaha bulshada. **Ma lahan isqoritaan cusub wixii ka dambeeya 10/1/2020*
- **Qiimeynta khatarta** – qiimeyn rabsho, daba gelid, rabsho galmo, ama hab dhaqan weerarid ah si loo xadido baahida loogu talagalay adeegaha daaweynta ama caafimaadka, nafsanaiga ah.
- **Wada-tashiga qoyska/shaqaalaha** – tababar xirfadeed iyo la-talinta qoyska iyo adeeg bixiyayaasha tooska ah si loo sii wanaajiyo in laga soo baxo baahiyada. La-talin ayaa la heli karaa.

Adeegyo Xirfadeed (la sii wado)

- **Daaweyn fardaha la xiriirta** – waayo-aragnimo fardaha la xiriirta oo kor loogu qaadayo koboca shucuureed iyo midka jireed ee lagu taageerayo qorshaha caafimaadka hab-dhaqanka ee aasaasiga ah.
- **Daaweyn muusik** – waxqabadyo muusik oo kor loogu qaadayo horumarka yoolalka shakhsiyeed ee taageeraya qorshaha caafimaadka hab-dhaqanka ee aasaasiga ah.

Adeegyada Daryeel-bixinta

- **Nasasho** – nasasho muddo-gaaban oo la siiyo dadka la nool oona daryeela macaamiisha.

Alaabta iyo Adeegyada

- **Tiknaloojiyada caawimaada** – waxyaabaha iyo tababarka loo isticmaalo in lagu horumariyo ama lagu sii wado awoodaha shaqada qofka.
- **La-qabsashada deegaanka** – hagaajin muuqaal oo lagu sameeyo waxyaabaha guriga, ee lagama maarmaanka u ah in ka-qaybgalaha uu ku sii noolaado gurigooda qoyska.
- **Dhar khaas ah** – dhar aan-xannibaad lahayn kuwaas oo loo sameeyay si waafaqsan baahida naafada.
- **Qalab iyo alaab daaweyn khaas ah** – qalabka iyo alaabta loo baahan yahay iyo agabka aan lagu helin hoosta Caawimaada caafimaadka (Medicaid) (Apple Care) oo ay ka mid yihiin qalabka iyo alaabta loo baahan yahay si loo fuliyo qorshaha taakulada hab-dhaqanka wanaagsan ama daaweynta.
- **La-qabsashada daaweynta ah** – wax-ka-beddelka deegaanka guriga si loo yareeyo ama meesha looga saaro walbahaarka dardargeliya dareenka.
- **Haggaajinta Baabuurka** – kuu samaynta baabuur kasoo bixi kara baahoyinkaaga taageerayana dhexgalkaaga bulshada.